DUGSIGA DHEXE EE ANTHONY: 2018-19 QORSHAHA KA QEYB-GALINTA QOYSASKA EE SANADKA

Waxaan u baahanahay taageerada qoysaska si aan ugu talaabsano qorsha iyo hadafka dugsigeena, iyo horumarka guusha ardayda. Hoos waxaa ku xusan qorshe u suurto galinaya in ay qoysasku ka qeybqaadan karaan, ama siyaabo u fududeynaya sidii ay uga qeybqaadan lahaayeen qorshaha sanad dugsiyeedka 2018-19. Waxaa jira nidaam iyo hadafyo gaar ah oo aan ka shaqeynayno si aan u gaarno qorshe kasta oo hoos ku xusan.

Fadlan la soo xiriir **Tonya Matthews, adigoo isticmaalaysid emailka Tonya.matthews@mpls.k12.mn.us, ama tell 612.668.3269.** Hadii aad qabto su'aalo ku saabsan fursadahaan hoos ku xusan ama aad doonaysid in aad bixiso jawaab ku saabsan qorshahaan.

Dhammaan qoysasku ay caruurtu u dhigtaan dugsiyadeena waa in ay dareemaan in uu dugsiyadeenu ay soo dhawaynayaan, waana in ay helaan fursado loo siman yahay si ay uga qayb qaataan waxbarashada dhalaankooda.

- Tixraacida iyo marti galinta xafladaha dhaqamada dugsiga
  Maalinta Dhaqanka Dadka Laatiinada, OKtoobar 12, 2018
  Maalinta Dhaqanka Hindida Maraykanka ah, November 16, 2018
  Bandhig Faneed iyo Casho , Febaraayo 7, 2019
  Maalinta Dadka Maraykanka Madoow, Febraayo 7, 2019
  Maalinta Dhaqanka Soomaalida, Abriil 11, 2019
  Maalinta Dadka Aasiya ka soo jeeda, May 1, 2019
  Maalinta Qoysaska, May 16, 2019

- Wargalinta qoysaska sidii ay uga qeyb-qaadan lahaayeen xafladaha ku xusan qorshahaan, iyo sidii ay qoysaska ula xiriiri lahaayeen shaqaalaha dugsiga:
  - Cusbooneysiinta kalandarka dugsiga ee bogeena internatka.
  - Jaraa'idka dugsiga
  - Qoraalo xayeesiin ah oo ardaydu guryaha u qaataan
  - Wacida qadadka taleefanada
  - Emails-ka
  - Ka cusbooneysiinta baraha bulshada wixii cusub.

- U fududeenta qoysaska adeegyadaan hoos ku xusan:
  - Adeegyo gaadiid meelaha looga baahdo
  - Turjubaano waqtiyada ay shirarku socdaan

Dhammaan qoysaska waxaa lagu wargeliyaa talaabooyinka uu dugsigeenu uu qaadayo si loo hagaajiyo natiijooyinka ardaygu uu ku gaarikaro horumarka loo simanyahay.

- Martigalinta kahadalka xaalada dugsiga sida (habeenka Title I) oo dhacaya taariikhdaan: **Oktoobar 30, 2018** ujeedkiisa:
  - Ku wargalinta qoysaska sharuudaha iyo faa'iidooyinka in aan ahaano dugsi haysta barnaamijka Title I
  - U sheegida qoysaska waxay xaqa u leeyihiin in ay ka qeybqaataan barnaamijka Title I
  - warbixinada qoysaska lagu wargalinayo imtixaanada heerka gobolka, iyo manhajyada dugsiyadeena waxay qaadanayaan sanadkaan
  - Siinta qoysaska guudd marka qorshaha istiraatiijiga ee qorshaha Hagaajinta Dugsiga (SIP)
- Ku dhajinta shabakadeena qorshaha hagaajinta dugsiga(SIP) daabacaado ay aqrinkaraan qoysaska

- U dirida dhambaalo ogeysiinaya qoysaska, hadii aynu qoondeeyneyno in taageero ku saabsan dib u hagaajinta dugsiga laga helo gobolka.

Qoysaska ayaa door muhiim ah ka qaadan doona horumarinta Qorshayaasha Dib-u-hagaajinta Dugsiyada iyo qorshaha ka qabgalka Qoyska, waxayna bixin doonaan talooyin qiimo leh oo ku saabsan sida aan kharashkeena u isticmaalno.

- Sidii loo heli lahaa aragtida iyo talooyinka qoysaska ee ku saabsan qorshaha hagaajinta dugsiga **bisha sebtembar**
- Helitaanka aragtida iyo talooyinka qoyska ee qorshaha ka qeybgalka qoysaska **bisha agoosto**
- Helida talooyinka ku saabsan sida aan u isticmaalno ilaha kheyraadkeena iyo sidii loogu tageeri lahaa guulaha ardaydeena, **bisha Febaraayo**
- Martigalinada kulamada caadiga ah ee guddiga dugsiga **bilaha Oktoober, Febraaayo, iyo Maajo ayadoo lawaafajinayo shirarka looga hadlayo xaalada dugsiga.**

Dhamaan xubnaha shaqaalaha dugsiyada, qoysaska, iyo ardaydu waxay fahmaan doorka muhiimka ah ee ay ka qaadankaraan hubinta in ardaydu uu ku guulaystaan waxbarashada dugsiyadeena.

- Abuurida heshiis waalidka dugsiga iyo ardayda, kaas oo ah heshiis uu ruux walba door lixaad ku yeelanayo si ay ardaydu horumar u garaan.
- Ka helida talooyinka ku saabsan heshiiskaan qoysaska waalidiinta dugsigeena **bisha Sebtember**
- La wadaagida waalidiinta dugsiga heshiiska qoyska iyo ardayga:
    * La wadaagida qoysaska bogga shabakadeena
    * La wadaagida qoysaska buugga xeerka dugsiga
    * U isticmaalida macluumaadkan shirarka waalidka iyo macalinka

Dhammaan qoysaska ay caruurtu u dhigtaan dugsiyadeena waxay fahmsanyihiin sida ay u taageeri lahayaan in caruurtoodu ay ku guulstaan waxbarshada.

- Ka caawinta qoysaska sidii ay u fahmi lahaayeen manhajka dugsigeena, imtixaanka gobolka,iyo qiimeynada imtixaanka ardaydu galeen, ama sidii loogu cabiri lahaa horumarka iyo guusha ardayga:
    * **[Ka qayb qaado habeenka loogu magacdaray "ku soco ama gasho kabaha canugaaga"oo ah kaalay oo deris xaalka waxbarashada ee ardaygaaga.**
    * **Shirarka waalidiinta iyo macalimiinta oo qabsoomi dooma laba waqti ama xili oo kala ah Octoober 17ka, 4:30pm ilaa 7:30Pm, 18ka, 8:30am ilaa 11:30am, iyo 25ka, 4:30pm-7:30Pm. Sidoo kale waxay qabsoomi doonaan Bisha Febraayo 14, 4:30pm ilaa iyo 7:30mp, iyo 15ka isla bishaas 8:30am ilaa iyo 11:30am.**
- Sidoo kale ka caawinta qoysaska sidii ay u fahmi lahaayeen manhajka dugsigeena,imtixaanka gobolka, qiimeynada imtixaanaayada ardaygoodu qaato iyo sidii ay ugu cabiri lahaayeey guusha iyo horumarka waxbarasho.
    * **[buuga Jadwalka ku quran yahay (planner) ee arday walba gaarka u ah]**
- Martigalinada munaasabadooyinka qoysasaka ee diiraada saaraya waxbarashada

Dhammaan shaqaalaha waxaa loo tababarayaa sidii ay sida ugu wanaagsan ugula shaqaynkaraann qoysaska.

- U diyaarinta horumarinta xirfadaha shaqaalaheena ee mowduucyadaan:
    * La shaqeynta qoysaska Soomaalida si taya leh.